



## WARBIXINTA WAXQABADKA HAY'ADDA WADDOOYINKA DPL SADDEXDA BILOOD

March, April, May 2022

OFFICE OF THE CEO

PUNTLAND HIGHWAY AUTHORITY

## Table of Contents

<i>Warbixinta Waxqabadka Hay'adda 3-da Bilood-March,April,May 2022 .....</i>	<b>3</b>
<i>Hordhac: .....</i>	<b>4</b>
<i>Ujeeddooyinka Hay'adda Sannadka 2022.....</i>	<b>4</b>
<b>1. WAXQABADKA HORUMARINTA MAAMULKA PHA.....</b>	<b>4</b>
<b>1. Waxqabadka Shaqooyinka Hormarinta Maamulka Iyo Maaliyadda:.....</b>	<b>4</b>
<b>1.1 Diiwaangalinta Hantida Hay'adda .....</b>	<b>4</b>
<b>1.2tababarka Shaqaalaha Maamulka Iyo maaliyadda .....</b>	<b>4</b>
<b>2.Shaqada iyo Shaqaalaha .....</b>	<b>5</b>
<b>2.1 Kulanka Billaha Ee Shaqaalaha .....</b>	<b>5</b>
<b>2.2 Abaalmarinta Bisha: .....</b>	<b>5</b>
<b>2.3 Abaalmarinta Shaqaalaha ee sadex biloodlaha: .....</b>	<b>5</b>
<b>2.4 kullamada laba isbuuclaha ee Agaasime waaxeedyada: .....</b>	<b>6</b>
<b>2.5 Shaqaalayn Shaqaale Cusub:.....</b>	<b>6</b>
<b>2.6 Tababarka Injineerada .....</b>	<b>6</b>
<b>2.7-Dayactirka Hay'adda .....</b>	<b>7</b>
<b>2.8 Qalabaynta Xafiisyada:.....</b>	<b>7</b>
<b>2.9.Dayactirka Shaybaarka Hay'adda .....</b>	<b>7</b>
<b>2.10 Samaynta Guddiga Sare Ee Hay'adda (BOD) .....</b>	<b>8</b>
<b>2.0 Waxqabadka Mashaariicda Dayactirka Jidka Laamiga Ah .....</b>	<b>9</b>
<b>2.1 Waxqabadka Mashaariicda Dayactirka Jidka Laamiga Ah Phase-2: .....</b>	<b>9</b>
<b>2.1.1 Mashruuca Dayactirka 45 Buundo Bosaso-Kalabayr:.....</b>	<b>9</b>
<b>2.1.2 Mashruuca Dayactirka Buundooyinka Qayaadsame .....</b>	<b>9</b>
<b>2.1.3 Mashruuca Dayactirka Waddada Xaaji-khayr .....</b>	<b>10</b>
<b>2.1.4 Mashruuca Dayactirka Jidka Laamiga Middigar .....</b>	<b>10</b>
<b>2.1.5 Mashruuca Dayactirka 8da Buundo Garowe- Birta Dheer .....</b>	<b>10</b>
<b>2.1.6 Mashruuca Dhisidda Jidka Laamiga 14km Laacdheere-Rabaable .....</b>	<b>11</b>
<b>2.1.7 Mashruuca Dayactirka Jidka Jalam-Xarfo .....</b>	<b>11</b>
<b>2.1.8 Mashruuca Dayactirka jidka laamiga Garowe-Falayryaale .....</b>	<b>11</b>
<b>2.2 Diyaarinta Qorshaha Dayactirka Jidka laamiga ah Phase-2 .....</b>	<b>12</b>
<b>3.Waxqabadka Sahanka Iyo Dayactirka Hay'addu Fulisay .....</b>	<b>12</b>
<b>3.2 Waxqabadka Goddad Buuxinta: .....</b>	<b>13</b>
<b>3.3 Furista Buundooyinka Iyo Biyo Mareenada: .....</b>	<b>14</b>
<b>4.Waxqabadka Koormeerrada Hay'adda.....</b>	<b>14</b>
<b>4.1 Kormeerka Guddoomiyaha Hay'adda Jidka Jalam-Xarfo: .....</b>	<b>14</b>
<b>4.2 Kormeerka Guddoomiyaha Xerada Qalabka iyo shaybaarka Buurtinle: .....</b>	<b>15</b>

4.3 Kormeerka 45-ta Culver-ti Bosaso-Kalabayr:.....	15
4.4 Kormeerka Dayactirka Buundooyinka qayaadsame : .....	16
4.5 kormeerka Jidka Laacdheere-Rabaable : .....	16
4.6 Daraasadda Qiimeyn ta Xaaladda Buundooyinka Garowe-Bosaso:.....	16
<b>5.Xoojinta Xiriirada Kala Duwan.....</b>	<b>17</b>
5.1 Xoojinta Xiriirkha Laamaha Dawladda.....	17
5.2 Xoojinta Xiriirkha Hay'addaha Caalamiga ah.....	17
5.3 XOOJINTA XIRIIRKA DADWEYNAHA.....	17

**Hay'adda  
Wadooyinka DPL**



**Puntland Highway  
Authority**

**Warbixinta Waxqabadka Hay'adda 3-da Bilood-March,April,May  
2022**



**XARIG JARKA DAYACTIRKA XAFIISKA HAY'ADDA WADDOOYINKA DPL**

---

HQ Office, Garowe, Puntland, Somalia, Email: [pha.plstate@gmail.com](mailto:pha.plstate@gmail.com)

[www.pha.pl.so](http://www.pha.pl.so)

## **Hordhac:**

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee 3da bilood oo ah warbixin soo koobaysa waxqabadkii iyo guulihii ay hay'addu ka gaartay, shaqooyinkii qorshaysnaa sadexdii bilood ee lasoo dhaafay

**(March, April, May),** iyo kuwii aan qorshaha ku jirin balse lagu guulaystay in la qabto.

Warbixintan waxqabadka hay'adda ee sadexda bilood ayaa ah mid dabakhaysa qorshayaasha waxqabad ee hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland sannadka 2022.

## **Ujeeddooyinka Hay'adda Sannadka 2022**

- 1- In la horumariyo Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda, (Management and financial capacity building) iyadoo lagu dhaqmayo qiyamka hufnaanta, isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta hay'adda.
- 2- In la horumariyo Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka Puntland (Technical Capacity Building) iyadoo kor loo qaadyo Awoodda Dayactirkha, Dhismaha, Naqshada, Sahanka iyo Shaybaarka.
- 3- Sahanka, Dayactirkha iyo horumarinta jidadka laamiga wayn ( Bosaso-Gaalkcayo & Garowe-Laascaanood) oo ah mashaariic ay fulinayso hay'adda PHA sanadka 2022.
- 4- Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirkha ee horumarinta Jidatka ay fulinayaan Qandraaslayda Maxaliga ah iyo kuwa Caalamiga ah.
- 5- In la xoojiyo Xiriirkha Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga, Deeq bixiyaasha, Dowladda iyo Dadweynaha, lana dhiso sumcadha Hay'adda.

## **I.WAXQABADKA HORUMARINTA MAAMULKA PHA**

### **I. Waxqabadka Shaqooyinka Hormarinta Maamulka Iyo Maaliyadda:**

#### **I.1 Diiwaangalinta Hantida Hay'adda**

Hay'addu waxay bishii march diiwaangalin ku samaysay hantida hay'adda, waxaana shay walba oo ka mid ah hantida hay'adda loo sameeyey asset No u gaar ah .

#### **I.2tababarka Shaqaalaha Maamulka Iyo maaliyadda**

Hay'addu waxay **12.03.2022** tababar ku saabsan nidaamka xisaabaadka ee Quick book u qabatay shaqaalaha waaxda maamulka iyo maaliyadda, tababarkan ayaa shaqaalaha waaxda maamulka iyo maaliyadda ka caawinaya inay u guuraan nidaamka xisaabaadka casriga ee quick book .

## **2.Shaqada iyo Shaqaalaha**

### **2.1 Kulanka Billaha Ee Shaqaalaha**

Waxa shaqaalaha hay'adda 3-dii bilood ee u dambaysay u qabsoomay kulanka billaha ahaa ee shaqaalaha hay'addu ku kala xog qaataan, marka laga reebo bishii afaraad oo uu kulanku kusoo beegmay maalmihii u dambeeyey ee bisha barakaysan ee ramadaan, sidaa darteed ay ahayd maalmo dadku cibaadado badsado.



### **2.2 Abaalmarinta Bisha:**

Waxay hay'addu abaalmarino iyo shahaado sharaf gudoonsay shaqaalihii ugu fiicna bishii MAY ee hay'adda.

Waxaana loo gartay shaqaalah hoos ku xusan:

1. Abdirasaaq Ali Abdi
2. Maxamed Shire Faarax
3. Maxamed Cabulahi Warsame



### **2.3 Abaalmarinta Shaqaalaha ee sadex biloodlaha:**

Waxaa kulankii ugu dambeeyey ee shaqaalaha oo dhacay 26-May, hay'addu ku abaalmarisay shaqsiyaadkii ugu waxqabadka fiicnaa hay'adda 3dii bilood ee lasoo dhaafay, waxaana loo gartay:

- 1.Khadar Axmed Cabdi
- 2.Maxamud Sulayman Axmed



## **2.4 kullamada laba isbuuclaha ee Agaasime waaxeedyada:**

Hay'adda waxaa si joogta u qabsooomay sadexdii bilood ee lasoo dhaafay kulamada labadii isbuuc mar yeeshaan Guddoona iyo agaasime waaxeedyada hay'adda.



## **2.5 Shaqaalayn Shaqaale Cusub:**

Waxay 07 March 2022 Shaqaalaysiisay Eng.Mohamed Mohamud Jama iyadoo hay'addu u qaadatay booska Material Engineer. Waxay sidoo kale hay'addu qof u qaadatay booska procurement and Legal advice, waxay hay'addu booskaas hay'addu u qaadatay Abdirasaaq axmed Nuur, oo isugu ku guulaystay tartankii loo galay booskan.

### **CONGRATULATION**

#### **PHA Procurement & Legal Officer**

##### **Educational Background**

- MBA at Amity University
- Master Degree of Procurement & ASM
- Bachelor Degree of Computer Science

##### **Employment History**

- Procurement Officer at PNTB, 2015 - May 2022
- Asset Manager at WRO, July 2013 - Jan 2015
- Vice Principal at Ahmed Gurey PSC, 2012-2013



**Abdirizak Ahmed**

**HIRE**

## **2.6 Tababarka Injineerada**

Waxaa 03 Jun guddoomiyaha hay'addu daahfuray tababar lagu qabtay xarunta hay'adda , tababarkaas oo ku saabsanaa noocyada mashaariicda buundooyinka casriga ah .



## **2.7-Dayactirka Hay'adda**

Waxaa bilihi March iyo April dib u dayactir balaaran lagu sameeyey qayba kala duwan ee xarunta hay'adda, sida xafiisyada shaqada hay'adda, shaybaarka hay'adda, dayrka bannaanka iyo gudaha, dhir jaris, iyo dhisme suuli cusub oo hay'adda loo sameeyey, dib u dayactirkan lagu sameeyey qayba kala duwan ee hay'adda ayaa kor u qaaday bilicda hay'adda.



## **2.8 Qalabaynta Xafiisyada:**

Hay'addu waxay dib u qalabayn ku samaysay xafiisyada hay'adda, waxaana shaqaalaha loo gaday agabka kala duwan ee xafiisyada sida miisas, kuraas iyo armaajooinka.



## **2.9. Dayactirka Shaybaarka Hay'adda**

Hay'addu waxay dayactir balaaran ku samaysay shaybaarka hay'adda oo ahaa shaybaar muddo hore la rakibay waxaana lagu sameeyey dib u habayn iyo qurxin, iyadoo la rajaynayo in qalab badan oo casri ah loo dalbo.



## 2.10 Samaynta Guddiga Sare Ee Hay'adda (BOD)

madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa **22 March 2022** magacaabay Guddiga Saree ee hay'adda (**BOD**) kadib talo soo jeedinta guddoommiyaha hay'adda, si loo helo shaqo ku dhisan isla xisaabsatan , loona helo kalsoonida iyo aaminaadda deeq bixiyaasha caalamka.

DOWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA  
MADAXWEYNNAHA



ولاية بونت لاند  
الصومالية

مكتب  
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA  
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Seer Madaxweyne Lr. 15 ee 22<sup>ka</sup> March 21, 2022, kuna saabsan  
magacaabid Guddiga Sare ee Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA).**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad.

**Markuu arkay:** Sharciga Hay'adda Wadooyinka PHA (Sharic Lr 18), qodobkiis 6aad

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la dhiso Guddiga Sare (BOD) Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA).

**Markuu tixgeliyey:** Talo soo jeedinta Guddoomiyaha Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA).

**Wuxuu xeeriyey:**

1. Guddiga Sare ee Hay'adda Wadooyinka Puntland PHA, waxuu ka kooban yahay 7 xubnood oo kala ah:

- 1.1. Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud
- 1.2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
- 1.3. Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta
- 1.4. Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada
- 1.5. Agaasimaha Guud ee Bangiga Puntland
- 1.6. Xubin ka socota Ururka Injineeradda Puntland
- 1.7. Xubin ka socota Rugta Ganacsiga Puntland

2. Xeerkani wuxuu dhaqan geleyaa markuu Madaxweynuhu saxiixo.

Siciid Cabdullaahi Deni  
Madaxweynaha Dowladda Puntland

Tell: +252-090-7797147; E-mail: [dq.oop@plstate.so](mailto:dq.oop@plstate.so), [oop@plstate.so](mailto:oop@plstate.so); Website: [www.plstate.so](http://www.plstate.so)

HQ Office, Garowe, Puntland, Somalia, Email: [pha.plstate@gmail.com](mailto:pha.plstate@gmail.com)

[www.pha.pl.so](http://www.pha.pl.so)

## **2.0 Waxqabadka Mashaariicda Dayactirka Jidka Laamiga Ah**

### **2.1 Waxqabadka Mashaariicda Dayactirka Jidka Laamiga Ah Phase-2:**

Dawladda Puntland waxay bartamihii sannadkii lasoo dhaafay 2021 bilawday qorshe isku tashi oo ay dawladdu maalgalinayso, waxaana mashaariicdan oo ilaa hadda phase-kii koowaad gaba-gabo marayo ku baxay lacag dhan \$7,753,406.

Hay'adda Waddooyinka PHA oo maamulaysay mashaariicdan ayaa dabagal, kormeeris iyo hubinta tayada(Quality Control) ku samaynaysay dhamaan mashaariicdan intii ay socdeen.

Mashaariicdan ayaa intooda badan soo gabagaboobeen bilihii March,April iyo May, waxaana hadda shaqadoodu socotaa meel fiicanna maraya laba mashruuc oo kala ah:

#### **2.1.1 Mashruuca Dayactirka 45**

##### **Buundo Bosaso-Kalabayr:**

Mashruucan ayaa waxaa dib u dayactir lagu sameeyey 45 Bridge, waxaana ku baxay lacag dhan \$863,500.00, Mashruucan ayaa shaqadiisa la qabtay 100%



#### **2.1.2 Mashruuca Dayactirka**

##### **Buundooyinka Qayaadsame**

Mashruucan oo shaqadiisa la dhamaystiray 100% ayaa waxaa lagu dayactiray buundooyinka qayaadsame oo labo ka mid ah lagu sameeyey dib udhisid(Reconstruction),halka sadex buundo oo kale lagu sameeyey dib u dayactir(Rehabilitation) Wuxaan ku ku baxay lacag dhan \$670,000.00 .



### **2.1.3 Mashruuca Dayactirka Waddada Xaaji-khayr**

Mashruuucan ayaa waxaa dib u dhis lagu sameeyey 4 Culverts waxaa sidoo kale dib u hagaajin(Rehabilitation) lagu sameeyey 4 birijj (Culverts),Waxaana ku baxay kharash dhan \$220,000.00 .



### **2.1.4 Mashruuca Dayactirka Jidka Laamiga Middigar**

Mashruuucan ayaa waxaa dib u dhisid(reconstruction) lagu sameeyey 33 birijj , waxaa sidoo kale dib u hagaajin(Rehabilitation) lagu sameeyey 11 Birijyo ,iyo dhigista 9km oo laami ah . Waxaana ku baxay lacag dhan \$1,650,000.



### **2.1.5 Mashruuca Dayactirka 8da Buundo Garowe- Birta Dheer**

Mashruuucan oo shaqadiisa la qabtaay 100% waxaa lagu dayactiray ilaa 8 birijj inta u dhaxaysa Garowe ilaa Birta dheer, waxaana ku baxday lacag dhan \$120,000.00 .



### **2.1.6 Mashruuca Dhisidda Jidka Laamiga 14km Laacdheere-Rabaable**

Mashruucan ayaa waxaa dib u dhisid cusub lagu samaynaya 14km oo ah inta u dhaxaysa Laacdheere ilaa Rabaable, iyadoo gabii ahaanbaa la xaaqayo waddada hadda, dibna loo saarayo laami cusub, waxaana ilaa hadda shaqadiisa la qabtay 60% ,Waxaana ku baxaya kharash dhan \$2,100,000 .



### **2.1.7 Mashruuca Dayactirka Jidka Jalam-Xarfo**

Mashruucan oo ay dawladda Puntland ku guulaysatay in uu dib u bilaabmo ayaa lagu dayactirya jidka laamiga ee Garowe-Galkacyo,waxaana phase-ka Iaad lagu dhisayaa 80km oo u dhaxeeye Jalam ilaa Xarfo, waxayna dawladda puntland kaga qaybqaadanaysaa \$1,800,000 (Contribution).



### **2.1.8 Mashruuca Dayactirka jidka laamiga Garowe-Falayryaale**

Mashruucan oo shaqadiisa lasoo gabagabeeyey dhamaadkii bishii Feb ayaa dib loogu dayactirayey goddadka iyo garbaha laamiga inta u dhaxaysa Garowe-Falayryaale, waxaana ku baxay lacag dhan \$329,609.00



Hadaba, kharashka wadarta guud ee mashaariicdan hormarinta kaabayaasha dhaqaalahaa gaar ahaan waddooyinka ay dawladda Puntland maalgalisay ayaa dhan **\$9,553,406** .

## **2.2 Diyaarinta Qorshaha Dayactirka Jidka laamiga ah Phase-2**

Hay'adda waddooyinka iyadoo hirgilanaysa qorshayaasha kaabayaasha dhaqaalaha ee dayactirka waddooyinka Dawladda Puntland, kuwaas oo phase-koodii koowaad soo dhamaaday.

Waxay hay'addu samaysay sahanno ay ugu kuurgalayo xoaladda jidka laamiga ah; sahannada ay hay'addu samaysay ayaa gundhig u noqon doona qorshaha dayactirka jidka laamiga ah Phase-kiisa labaad kaas oo lagu wado in uu bilawdo bilaha soo aadan.

Mashruucan ayaa noqon doono mid ay tartan furan u gali doono shirkadaha qandaraasleyda dalka, lagana qaadan doono shirkadaha ugu tayada iyo qalab fiican.

Waxayna hay'addu xilli horaba shirkadaha dhismaha dalka lasii wadaagtay xogta shaqada mashruucan, iyo waxyaalahay ay muhiimka tahay in laga helo shirkad walba

Waxaana hay'addu mashruucan phase-kiisa labaad ugu tala gashay in lagu dayactiro sagaal goobood kala ah .

1. Waddada Garowe-Sinujiif
2. Waddada Sinujiif-Dangoroyo
3. Waddada Dangoroyo-Xaajikhayr
4. Waddada Xaajikhayr-Qardho
5. Waddada Qardho-Waaciye
6. Waddada Waciye-Carmo
7. Waddada Carmo-Bosaso
8. Waddada Garowe-Falayryaale
9. Waddada Xaarxaar-Jalam


---

## **3.Waxqabadka Sahanka Iyo Dayactirka Hay'addu Fulisay**

### **3.1. Sahminta Burburka Jidka Garowe-Bosaso**

Horaantii bishii March 2022 waxay koox injineero ah oo ka koobnaa 5 qof, oo uu hogaaminayo Lead engineer-ka Hay'addu sahmin ku samayeen burburka soo gaaray jidka Garowe-Bosaso,sida garbaha waddada,buundooyinka,goddadka ka samaysmay jidka,iyo buundooyinka xirmay; iyadoo sahankan loo qaybiyey laba qaybood A- Garowe-Qardho iyo B-Bosaso-Qardho.

Warbixinta sahankan oo qaata muddo laba isbuuc ah ayaa asaas u noqon doonta qorshaha dayctirka jidadkaas sannadka 2022.



### **3.2 Waxqabadka Goddad Buuxinta:**

Kooxda dayactirka joogtada ah ee hay'adda ayaa wadda wajiga labaad ee goddad buuxinta jidka laamiga ah, kaas oo lagu buuxinayo goddadka samaysmay inta u dhaxaysa Bosaso iyo Qardho.

Waxay hadda shaqada goddad buuxintu laga qabanayaa inta u dhaxaysa Sheerbi iyo Waaciye. Horay waxay kooxda dayactirku usoo qabteen goddad buuxinta Garowe ilaa Qardho .

Shaqada goddad buuxinta ayaa ah dayactir joogta ah oo hay'addu samayso.




### **3.3 Furista Buundooyinka Iyo Biyo Mareenada:**

Waxaa bishii May-2022 kooxda dayactirka ee hay'addu dib u fureen buundooyinka iyo biyo mareenada xirmay inta u dhaxaysa Qardho iyo Bosaso.

Shaqada ayaa xoogga lagu saaray furista dhuumaha biyuhu maraan ee laamiga dhexdiisa iyo hareerihii , kuwaas oo ay xireen dhir,ciid,iyo dhagax.

Shaqadan ayaa ah mid ay hay'addu ku nadiifinayo jidka laamiga ah,taas oo khatara keeni kara haddii ay sidan sii ahaadaan.

waxaa shaqada nadiifinta buundooyinka iyo biyo mareenada wajiga labaad laga qaban doona inta u dhaxaysa Qardho iyo Garowe.



### **4.Waxqabadka Koormeerrada Hay'adda**

#### **4.1 Kormeerka Guddoomiyaha Hay'adda Jidka Jalam-Xarfo:**

Guddoomiyaha Hay'adda PHA ayaa 07-March kormeer shaqo ku tagay dhismaha jidka jalam-xarfo kaas oo dhan 65km, mashruucan oo dhaqaalaha ku baxay uu dhanyahay \$6,100,000, ayaa waxaa 70% bixinaya European Union (EU), Halka 30% ay bixinayso Dawladda Puntland.



#### **4.2 Kormeerka Guddoomiyaha Xerada Qalabka iyo shaybaarka Buurtinle:**

Guddoomiyaha hay'adda PHA ayaa 05-March kormeer shaqo ku tagay xerada qalabka hay'adda iyo shaybaarka buurtinle .

Guddoomiyaha ayaa warbixin ka dhegaystay shaqaalahaa goobta, iyagoo uga warbixiyey habka shaqada iyo xaaladda gaaddiidka iyo caqabadaha.



#### **4.3 Kormeerka 45-ta Culver-ti Bosaso-Kalabayr:**

Guddoomiye ku xigeenka hay'adda iyo koox injineero uu hogaaminayo ayaa 28-april kormeer shaqo ku tagay mashruuca 45-ta Dhuumaha Biyuhu maraan ee loo yaqaano (Culverts) ee ku yaalla inta u dhaxaysa Bosaso-Kalabayr.

Ujeeddada kormeerkhan ayaa ahaa in lasoo qiimeeyo xaaladda dayactir dowladdu ku samaysay 45-ta Biyo mareen oo lasoo gabagabeeeyey.

Mas'uuliyiinta shirkadda mashruucan fulisay ayaa ka warbixiyey shaqada ay qabteen.

Wafdigan ayaa mid mid u dul istaagan 45-ta Culvert ee la dayactiray.



#### **4.4 Kormeerka Dayactirka Buundooyinka qayaadsame :**

27-April waxay guddoomiye kuxigeenka hay'adda oo ay weheliyaan qaar ka mid ah injineerada hay'addu kormeer shaqo waxay ku tageen buundooyinka qayaadsame.

Ujeedka kormeerkhan ayaa ahaa in lasoo hubiyo shaqada qandaraasluhu qabtay maadaama ay gabii ahaanba soo idlaadeen shaqooyinkii laga hayey goobtaas.

Mas'uuliyiinta shirkadda albashid ayaa wafdiga uga warbixiyey shaqada ay qabteen.



#### **4.5 kormeerka Jidka Laacdheere-Rabaable :**

Koox uu hogaminayo Guddoomiyaha hay'adda PHA ayaa 31-May kormeer shaqo ku tagay dib u dhiska lagu samaynayo jidka laamiga ah Laacdheere-Rabaable. Shaqada mashruucan ayaa meel wanaagsan maraysa waxaana socota shaqada dhigista ciidda iyo garaacisteeda . Mashruucan ayaa hadda shaqadiisa la qabtay 60%.



#### **4.6 Daraasadda Qiimeynta Xaaladda Buundooyinka Garowe-Bosaso:**

Injineerada hay'adda waddooyinka DPL ayaa ayaa laga bilaabo 17-May, muddo isbuuc ah daraasad ka samaynayey xaaladda buundooyinka inta u dhaxaysa Garowe-Bosaso, Daraasaddan ayaa lagu ogaanayey hawlaho dayactir ee buundooyinku u baahanyihiin.



## **5.Xoojinta Xiriirada Kala Duwan**

### **5.1 Xoojinta Xiriirkha Laamaha Dawladda**

Hay'adda waddooyinka DPL, waxay xoojisay xiriirkha kala dhaxeeya hay'addaha kala duwan ee dawladda Puntland oo ay wada shaqayntu ka dhaxayso, iyagoo si fiican warbixinadda iyo xogaha u kala qaata .

### **5.2 Xoojinta Xiriirkha Hay'addaha Caalamiga ah**

Hay'addu waxay xoojisay xiriirkha kala dhaxeeya hay'addaha caalamiga ah kuwooda wada shaqaynta dhaw la leh hay'adda .

### **5.3 XOOJINTA XIRIIRKA DADWEYNAHA**

Hay'adda waddooyinku iyadoo ka duulaysa in ay dadweynaha Puntland ugu shaqayso si daahfuraan leh, isla markaana dadweynuhu ula socdaan shaqooyinka ay hay'addu u hayso bulshada, waxay hay'addu si joogta ula wadaagtaa bulshada meelaha ay marayaan shaqooyinka ay hay'addu waddo, iyaddoo warbixinada u marinaysa qaybaha kala duwan ee war isgaarsiinta sida facebook.